# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:11 AM** **Hansard No.24/1** **Kal-fadhiga 24aad**

**Fadhigii 2aad** ***04/05/2013***

**Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 24aad oo Socotey Maalin kaliya kana qeyb qaateen 15 Mudane.**

1. **Md. Axmed maxamed Nuur:-** Xildhibaanada, saxaafada, shaqaalahaba waad salaamantihiin bacda salaam mudanayaa ajandahan kal-fadhiga 24aad mashaariicda sharci waxay ka koobanyihiin 12sharci sidaa owgeed anigu waxaan u soo kala hormariyay sidan:

    - ✓ Xeerka ka ganacsiga Halaha Bananka
    - ✓ Xeerka xabsiyada
    - ✓ Xeerka saxaafada( wanan odhan lagaa dhibato badan oo jirta awgeed hala dadajiyo xeerkaa saxaafada ayaan soo jeedinayaa)
    - ✓ Wax kabadalka iyo kaabista xeerka diwaan galinta ( sobabta oo ah in aan wax caqabad ah ka iman doorashooyinka inagu soo fool leh)
    - ✓ Xeerka siyaasada ganacsiga
    - ✓ Xeerka caasimada
    - ✓ Xeerka duulista iyo hawada
    - ✓ Xeerka hay'ada HIV
    - ✓ Xeerka siyaasada Wax barashada
    - ✓ Xeerka la dagaalanka argagixisada
    - ✓ Xeerka ilaalinta duur joogta

2. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** Gudoomiye anigu horta Qodob ayaan ka hadlayaa, Golahan Wakiiladu wuxuu dalka Hogaamintiisa ka ogyahey ma jirto, waxaa shaley jaraa'idka ku qornaa 50 Hawiye ah baa soo socda, waxaan leeyahay Golahani qeybtii uu kulahaa hogaaminta dalka waa in la helaa oo Ajendahan ay meel kaga taalo, taasna halkaad Gudoomiye kaga dareysid qodobkaa waa

inuu ku jiraa, maalintii hore khalad baynu galno Xukuumada fasax baynu siiney, ilaa maantadaa boqolaal wada-hadal bay gashey oo cid warbixin ina siisay ma jirto.

laba Qodob baynu markaa u baahanahey oo kala ah ineynu Fasaxii ka noqono aynu siinay Xukuumada ama ineynu wax kala socono hogaaminta dalka.

**Xeerkan Diiwaangalinta Codbixiyaasha:-** Doorashooyinka baa soo socda oo waa muhiim, laba Diiwaangalin baa is barbar socoda, Diiwaangalintii Diiwaangalin Muwadinka doorashooyinka wax ka khuseeya ma jiraan, Makraa Xeerkii Diiwangalinta Codbixiyaasha waa in halkan lagu soo daraa.

**Xeerka Diiwangalinta Muwaadinka:-** Diiwaangalintan Xeerkeedii la keeni dawladu iska wadatao idinkaa shirgudoonkii ah ee ha lahakiyo Diiwaangalintaa intaan Golaha laga ansixin.

Xeerkii Booliiska:- xeerkii dhibaatada badan inaga gaadhey su'aal baan ku weydiinayaaye miyaa la soo celiyay mise Madaxweynuhu wuu saxiixay?

**Gudoomiyaha:-** Xogheyntu waxay ii sheegtey in Xeerka Qodob la soo celiyay.

**Md. Siciid:-** dee Xeerkii kuma qorna halkan maxaa loo soo galinwaayay, isagana waan in lagu soo daraa.

**Md. Ibraahim Axmed Haybe Point of Clarification:-** Munane hadii aan saxo halkaa waxaa jiran laba Diwaangalimood oo kala ah mida muwaadinka iyo codbixiyayaasha markaa way kala muhiimsanyihiin labadaaasi waayo hadii aan lahayn muwaadinkii codka bixinayayba codna lama bixin karo oo dhibaatiiyinka shalay ina haystay ayay ka mid ahayd markaa waa in la kala saaraa muwaadinka iyo ajaanibka waxaanan aamin sanahay in aad iyo aad loogu baahan yahay waana in la dadajiyaa.

3. **Md Bashiir Xuseen Tukaale:-** Dhamaan mudanayaasha iyo shirgudoonkaba waan salamayaa salaam ka dib ajandahan ina horyaala anigu waxna waan ka saari lahaa waxna waan ku soo dari lahaa

Waxaan ka saari lahaa:-

**Xeerka saxaafada**:-

Waxaan kale oo aan ku soo darilahaa **Xeerka xamaynta Xakamaynta Ajaanibka** waxanan soo jeedinayaa in xeerkaa sida ugu dhakhsaha badan ay u curiyaan Gudiyada iyo Goluhuba waana xeer loo baahan yahay, **Xeerka Ganacsiga Baanankana** aad ayaa loogu baahan yahay ee waa in la dadajiyaa oo uu kalfadhigan dhaqan galo ayaan ku talin lahaa.

**Xeerka diwaangalinta** waan in wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyaa waana in la dardar galiyaa.

4. **Md. Ibrahim Axmed Ragal:-** Gudoomiye iyo dhamaan mudanayaashaba waan salaamayaa salaam ka bacdi waan u mahad naqayaa shir gudoonka iyo xoghayntaba Ajandaha wanaagsan ee ay soo gudbiyeen wanan u arkaa wakhtiga inoo hadhsan awgii in uu ku badan yahay maadaama uu yahay 12 Qodob.

   Sidaa darteed waxaan anigu ka xulanayaa ilaa 6 qodob oo aan idhaahso 6daa aan xooga saarno anan ka shaqayno, waxaana ugu horeeya

   - ✓ **Xeerka Xabsiyada**
   - ✓ **Wax ka badalka iyo kaabista xeerka Diwaan galinta**
   - ✓ **Xeerka siyaasada waxbarashada**
   - ✓ **Xeerka hay'adaha Tayada**
   - ✓ **Xeerka hay'adda Dib u Eegista Shuruucda**
   - ✓ **Xeerka ilaalinta Duur joogta iyo Keymaha**

   Lixdaa xeer ayaan jecelahay mudadan gaaban in uu goluhu si fiican uga hawl galo oo aan soo jeedin lahaa inta kale lafteedu way badantahaye waa in dib loo dhigaa

5. **Md. Cali Maxamed Aadan:-** Waxaan idinku salmayaa salaanta islaamka kadib shir-gudoonka xildhibaana iyo shaqaalahaba iyo saxaafadaba waan salaamayaa waxaan soo jeedin lahaa in ajandahan lagu soo ururiyo hal qodob oo waxa kale la iska dhigo wayo sadex casho ayuu kooramku furmi laayay saw in sobobta la is weydiiyo maahan, anaana sobobta idiin sheegaya xildhibaanada Golaha wakiiladu xasanad mahaystaan Gudoomiye waxaana daaqada laga tuuray Datuurka Somaliland Qodobkiisa 49 ee ka hadlaya xasaanad xidhibaanada Golaha wakiillada.

Sidaa awgeed waxaan leeyahay ilaa **xasaanada xildhibaanka** meel ladhigayo yaan wax kale laga hadlin waana in loo yeedhaa Madaxweynaha waayo waa Dastuuri Goluhuna isku imanmaayo intaa ayaan ku soo koobayaa waad salaaman tihiin.

6. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi: -** Shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salamayaa la islama diidana in uu xidhibaanku xasaanad leeyahay waana in aynu ilaashanaa waa daruuri waayo inagu madaba galno marka ay wax dhacdooyinku dhacaan si wanaagsana looma xaqiijiyo.

   Marka ugu horaysa anuu waxaan soo jeedin lahaa iyada oo ay ugudbi doonta maxdaxweynaha waa in loo yeeshaa jananad oo la waydiiyaa miyaydaan aqoonsanayn xasaanada xildhibaanada, ma idinkaa ku balamiyay askarta waana in so noqnoqoshada arinkaa laga hadlo waa waa jib waxaanan leeyahay si wada jira aynu u yeedhno jananada iyo saraakiisha, wasiirka, markaa hadii wax laga qaban waayo dan ayay Madaxweynaha ugu tagi.

   Hadii aan ajandaha u soo laabto qodobka ugu horeeya Xeerka ka Gacansiga Hawlaha BangiyadaJSL anuu marka horaba waan ka saarayaa ajandaha Qodobkaa waayo xeerkii bangiyada ayaan hore u ansixinay xeerkalana uma baahnin waayo xeerkaasi sina uma wanaagsana waayo ribaa ku jirta ribana dooni mayno umaduna uma baahna wanan ka baxay

7. **Md. Siciid Maxamed Cilmi :-** Shirgudoonka iyo xildhibaanadaba iyo saxaafadaba waan idin salamayan Ugu horayn qodobka ku saabsan xasaanada Xidhibaana oo baryihii ugu danbeeyay xildhibaano lagu wax yeeleeyay qaarna lagu xidhay oo aan dhamaan isla afgaranay halka qodobka odhanaya madaxweynaha ha loo yeedho iyo jaran jarada ka horaysa lagu kala aragti duwanyahay anigu waxaan ayidayaa Qodobka odhanaya Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha iyo Taliska Booliska ha loo yeedho, Madaxweynaha

   Hadii aan ajandaha u soo dago waxaa wanaagsan in aan waaqici noqono oo aan xisaabino mudada aan haysano waayo 12 Qodob ayaa ku qoran ajandaha markaa aad ayay u yartahay mudada aan haysanaa Ramadaana way soo galaysaa.

   Markaynu xisaabino mudada fasaxyada marka laga reebo waxa inoo soo hadhayaa waa 31 maalmood, sida aan wada ognahayna xeerkii waxaan ka shaqaynaa mudo 8 maalmood ah ugu yaraan, markaa hadii aan si dhaba u eegno ama aan isku qaybino waxaan kaliya meel marin karnaa waa 4 xeer

halka ay ku qoran yihiin 12 xeer meesha oo ay inoo dheeryihiin hawlaha kale ee ay ka midka yihiin sida tan hada laga hadlayo.

Waxaan marka ugu horaysa soo jeedinayaa in marka hore laga saaro Ajandaha Xeerka Saxaafada waayo xeer hore ayaa jiray lamana is ticmaalin waxaa kale oo aan kor haloo hayo dhan lahaa **Xeerka ka Gacansiga Hawlaha Bangiyada JSL** oo doodbadani ka taagan tahay oo dhamaan bulshaduna aad ugu soo horjeedo waxaanan soo jeedin lahaa in lala kaashado Culimada.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in sadex qodob lagu soo koobo ajandaha looguna horaysiiyo oo qodobka 1aad laga dhigo

1. Xeerka Ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha
2. Xeerka Siyaasada Waxbarashada
3. Xeerka Duulista Hawada

8. **Md. Saleeban Cawad Cali (Bukhaare):-** Anigu Ajendaha la soo diyaariyay Muhiim maaha Sidey u kala horeeyaan, Gudiddii Xeerkeeda keentaba waa la qabanayaa, Anigu Laba Qodob Meeshaba waan ka saari lahaa:-

- ✓ **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baanka:-** wuxuu ka soo horjeedaa Shareecada Islaamka, Wuxuu ka soo horjeedaa Dastuurka, ninka Sharciyay waa nin ilaahey la dagaalamaya, waa nin Baan ribawi ah sharciyeeyay, waa nin Xaraan sharciyeeyay Markaa Xeerkaasi waa Xaaraane halaga saaro.
- ✓ **Xeerka Caasimada:-** Xeerkaas oo soo noqdey oo la leeyahey Moshin baa lagu keenayaa, Moshinkaa Xeerkan lagu keenimaayo wuxuu la socdaa oo ka horeeya *Xeerkii Kala-xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka,* Markaas ayaa Caasimada Xadkeeda la garanayaa, Markaa waxaan leeyahey Xeerkaana ha laga saaro Secondedna wuu helay, dhowrjeerna waa la celiyaye.

- ✓ **Xeerka Saxaafada:-** Xeerka waxaan leeyahay Xeer baa jire Maanta sidiisa ha loo daayo, Markaa Xeerkaa Saxaafada ee Cusubna halaga saaro Ajendaha ayaan soo jeedinayaa.

**Waxaan ku soo galinayaa Ajendaha:-**

- ✓ **Xeer-hoosaadka iyo Xasaanada:-** Qodobkaa waa laga Hadley Xildhibaana Wax la yeelay, way jirtaa oo waa run, Markaa waxaan

odhan lahaa intaba Xeer-Hoosaadka ha lagu cadeeyee Isagana Ajendaha ha lagu soo daro waayo meelo badan oo ku jiraana Dastuurkey Khilaafsan yihiin.

9. **Md. Baar Siciid Faarax:-** Sida la sheegay waxaan la qabaa Mudanayaasha:-

- ✓ **Xasaanada Xildhibaanada:-** Arrintaas dhowr jeer bay dhacdey Jananka iyo Wasiirada waa loo yeedhey, u maleyn mayo in iyaga kaliya ha loo yeeho Xildhibaanada yidhi in wax laga qabanayo, Markaa anigu waxaan Raacsanahey Xildhibaanada Yidhi Madaxweynaha ha loo yeedho.

Markaan u soo noqdo Ajendaha, wakhtigu wuu inagu gaaban yahay in badana fasax baynu ku jirney arrimo muhiima ahina way ku jiraan, Markaa aniug waxaan qabaa in Xildhibaanadu Shaqada marka hore iyagu wakhti hore soo galaan oo la iska daayo in badan baynu fasax ku jirneye war-wareega si wax badan aynu u qabano, taasna xildhibaanada ayaan u jeedinayaa.

Waxaan qabaa madaama wakhtigu inagu yaryahey ramdaantana aynaan shaqeyn kareyna ineynu 4 Xeer ajendaha kala soo baxno inta kalena dib u dhigano oo dib uga shaqeyno:-

- ✓ Xeerka Xabsiyada:- isagu waa muhiim sababtoo ah waynu garaneynaa Maalintii dhoweyd Dhibaatadii dhacdey wixiina in laga taxadaro bay u baahantahey.

- ✓ **Xeerka Wax ka badalka iyo kaabista Diiwaangalinta**:- kaas oo muhiim u ah Doorashooyinkii iyo Geedi socodkii oo ku xidhan.

- ✓ **Xeerka Hay'dda Dib u eegista Shuruucda**, waayo shuruucda waxyaabo badan baa u baahan in dib loo eego sida kootadii dumarka oo kale, markaa Xeerkaana waxaan ka dhigayaa kan saddexaad.

- ✓ **Xeerka Ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha:**- aafooyin baa ka jira wadankeenii aad u farabadan iyo abaaro iyo roob la'aan, intaba ilaahey baa haya, laakiin saameyntu waa Xaalufka dhirtii la jarey oo iminka buurihii baa iminka lagu darey oo waxaad arkeysaa Buuro dhan oo la iibiyay oo meeshiiba banaan laga dhigey, marka dhirtii iyo

buurihiiba la dhameeyo waa dhibaato dadkii iyo xoolihii ku soo socota ileyn dadku xoolo la'aan ma noolaan karayo eh, Markaa anigu 4 Xeer baan odhan lahaa halaga dhigo kuwa ugu mihiimsan ee aynu iminka ka shaqeyneyno oo aynu ka gaadhsiino Ramadaanta.

- ✓ Waxaan kaloo soo jeedin lahaa hadii laga gaadhsiin karo Heshiiyada Caalamiga ah, hadii kalena ajendaha dambe ha lagu soo daro waa muhiime, Xeerka Saxaafada, Saxaafadu Xeer bay leedahay waxyaabahaan dhaafey buu ka mid yahay.

**Xaalada dalka Abaaraha iyo Roob la'aanta:-** Hargeysaa roob ka da'ay oo dadkuba in dalkoo dhan roob ka da'ay bay u haystaan, dalka inta kale roob kama di'in waa abaar qeylo badan baa jira dadkiina bakhti buu ku jiraa, Xoolihii iyo dadkiiba iney bakhtiyaan baa laga baqayaa, Ceelishii riigaga ahaa nuurad bay soo qaadayaan Markaa Xaalada Abaareed aynu ka dhigno Xaalad deg-deg ah oo iminka iyada Gooni aynu uga hadalno.

10. **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe):-** Xeerarka Meeshan ku qoran dhamaantood waa muhiim oo kuwo dalku u baahan yahay intan iyo ka badanba, hase ahaatee anigu midbaan eegayaa, Xeerarku sidey u soo kala horeeyeen baan eegayaa, marka waxa weeye qaarbaa sideedii sano aynu meesha joogneyba arkayay, markaa sidey u soo kala horeeyeen aynu u kala horeysiino, hadii aynu sidey u sii kala muhiimsan yihiin u eegno qaarkood wakhigan la joogo aad loogu sii baahan yahay, sida Xeerka Diiwaangalinta Muwaadiniinta, waan arkey Wasiiirka Arrimaha Gudaha iyo waxay iska wataan Diiwaangalin aan Xeer u jideyn, markaa waxa weeye Gudidii Arrimaha meedey, Xeerkii Diiwangalinta oo aan la sameyn sidey u sameyn karaan diiwaangalin.

    Waxaan leeyahay waa ineynu u yeedhno Wasiirka Arrimaha Gudaha oo uu inoo sheego qaabka uu wax u wado oo aynu la fahano si aynu ula eegno, Markaa arrigaa aad baan ugu saluugsanahey sidey Xukuumadu u wado.

    Xeerka Saxaafada aad iyo aad baa loogu baahan yahay, halkan waxaynu u fadhinaa ineynu regulategareyno oo wax ka qabano dhibaatooyinka Saxaafada ee jira, Xeerkii hore ee jirey anigu xog-ogaal baan u ahey maaha mid saxaafada Xuquuqdii ay laheyd siinaya, xuquuq faro-badan oo ayna laheyna siinaya, Markaa Dhexdhexaada oo siduu u anfici lahaa ilaahey hortii ah aynu u eegno

oo Xeerka keeno sideedii sano ee aynu halkaa joogneyna wuu soo noq-noqonayay, Xeerka markaa aynu cuqdada ka saarno oo aynu eegno waana kii hore oo aynu Amendment lagu sameeyay.

11. **Md. Siciid Warsame Ismacill:-** anigu marka hore waxaan ka hadlayaa arrintii Xasaanada ee laga hadlayay, Gudoomiye arrintaasi waa mid sensitive ah, mana aha dilis oo kaliya waxay mareysaa bahdil oo Wasiradii iyo Xafiisyadii Dawladu ay kugu balamiyaan askartoodii, waxay tahey inaanu jirin Xeerkii Maamuuska Qaranka ee ahaa sidii loo kala sareeya, Agaasimihii Guud baa Xildhibaankii ka Maamuus sareeya, arrintaa waxaan u arkaa iney tahay in laga dhigo Qodobka kowaad ee Ajendaha.

Arrinka kale waxa weeye Xaalad adag buu wadanku ku jiraa, Xaalad siyaasadeed buu dalku ku jiraa, Xaalad Abaareedna wuu ku jiraa, Xaalad Nabadgalyona way jirtaa oo Gobolada Bariga waxbaa ka shuuqaya oo Ciidamaa Taleex tagey oo sii yaacey oo hadana soo yaacey arrintaa inagu meynu fahmin, waxaan leeyahay Sidii Xildhibaankii ugu horeeyay Sheegay in Hogaaminta Dalka Goluhu wax ku yeesho Xaaladahaana wax laga eego oo la qiimeeyo.

Xeerarka Ajendaha hadaan eego:-

- ✓ **Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Diiwaangalinta:-** Xeerkaas oo ku jira 6aad waxaan ka dhigi lahaa kan ugu horeeya.
- ✓ **Xeerka Hay'adda Tayada:-** Xeerkaasina waa muhiim wuxuu dalku ku shaqeeyo manta garanmeyno.
- ✓ **Xeerka Ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha:-** Sababtoo ah waxaa jira dabar'go ku socda Duurjoogteenii hadaan wax laga qaban, keymihiina way ka daranyihiin.
- ✓ **Xeerka Siyaasda Waxbarashada:-** Xeerkaasina waa muhiim oo anigu waxaan eegayaa sidey dalka ugu kala manafaacaad badan yihiin.
- ✓ **Xeerka Ganacsiga Bangiyada:-** waxaan odhan lahaa Xeerka inteynaan inagu carqaladeyn horta meesha waxa ku soo jira aynu eegno, Markaa Xeerkaana hadii laga darayo isna waan ku dari lahaa.

**Laba Xeer Waan ka saarayaa Ajendaha:-**

- ✓ **Xeerka Saxaafada:-** mar hadii Xeer hore jirey in la soo dhigo maaha, micnaheeduna wuxuu noqonayaa in loo hub urursanayo sidi Saxaafada loo cubudhin lahaa.

- ✓ **Xeerka Argagixisada:-** waayo xeerkii Sirdoonka ee aynu ansixiney ayaa wali dadka dhagihiisa ka qeylinaya, RRU baa dadkii samada kaga soo dhaceysa, xeerkaasina waa kii dadka inta ugu dambeysa lagu xidh-xidhi lahaa.

12. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Dooda Ajendaha si toos markaan u gudagalo:-

- ✓ **Xasaanada:-** horta waxaan leeyahay waa ilaahey mahadii, qoladayaada Mucaaradka kor warqad meel naloogu soo dhajiyo oo askarta madaxtooyada nalagu balamiyo iyo kol meelahaa naloo istaajiyoba baryahaaba anaga way na haysatey, mar hadey qoladiinii muxaafidka aheyd hadii ay idin taamatey waa ilaahey mahadii, arrintaasi waa mid goleheena nusqaantiisa ah inagaa u sabab ah in xildhibaanka dibada lagu jiid-jiido oo Agaasimuhu protocolka ka yeesho, Xildhibaanku wuxuu leeyahay Xasaanad dastuurku uu siiyay oo la mid tan Madaxweynaha oo labada kaliya ee la soo doortey.

  Sidaa darted Xeer-hoosaadka iyo xeerarka kaleba way cadeynayaan, Markaa waa aynu Xeerkaa Xasaanada ansixinaa oo 55 inteynu ka dhigno Xukuumada khasab lagaga dhigaa iney ku shaqeyso, tan kale waan la qabaa in Madaxweynaha loo yeedho, Warqad official ahna loo qoro.

**Ajendaha in horyaal waxaan u kala horeysiin lahaa:-**

- ✓ **La socodka iyo Ilaalinta Siyaasda Dawladu dalka ku dhaqeyso iyo Qiimeynta Xaalada dalka:-** waa Qodob Dastuuri ah oo awood Golahan u siinaya, sidaa darted waxaan qodobka ka dhigi lahaa kan koowaad ee ajendaha, duruuf baa keentey waayo manta waynu la soconaa marxalada dalku marayo, meeqaamkii iyo jiritaankii Jamhuuriyad ahaan aynu caalamka ku laheyn inay hoos u dhacdey oo ku sii socoto inaynu Maamul Goboleed Somaliya ka mid ah aynu ku dhownahay, sidoo Kale, Nabadgalyad, Maciishada iyo Qabyaaladu meeshay marayaan, Markaa Madaxweynaha aynu ka dhigno masuulka ugu horeeya ee aynu u yeedheyno.

**Waxaan ka saarayaa AJendaha:-**

- ✓ **Xeerka Saxaafada:-** Xukuumadu waxay noqotey Xukuumadii ugu horeysay ee Cabudhinta ugu badan sameysay, Xeer Saxaafadeed oo

manta loo baahan yahay oo aynu curinaa meesha mataalo, Xeerkani Gudidda Arrimaha Bulshada ayuu horyaaley maaha mid Goleyweynaha soo gaadhey, Aniguna Xildhibaan ahaan ma jecli inuu Xeerkaasi halkaa soo dhaafo, waa inuu Xeerkaasi halkaa ku saqiiraa, sababtoo ah Xeer Saxaafadeed oo dhaqangal ah ayuu dalku leeyahay, markaa arrintaa waan idiinka digayaa ee meesha halaga saaro.

- ✓ **Xeerka Hay'adda Dib u-habeynta Shuruucda:-** Dastuurku Golahan ayuu siiyay dib u-habeynta shuruucda iyo ilaalintooda, waxaan u arkaa iney tahay hay'ad la doonayo in lagu majaro habaabiyo Shuruucda dalka oo cid gaar ah gacanta loo galiyo si u noqoto cidii controleysay Shuruucdii iyo Dastuurkii dalka, dastuurkuna Golaha Wakiilada ayuu siiyay Dib u-eegista Shuruucda.

**Xeerka Diiwaangalinta:-** waxaad la socotaan in dalka laga dhawaaqey Madaxweynuhuna Degreeto ku soo saarey Gudidda Diiwaangalinta Madaniga ah, Gudiddaasi waa xaaraan sharci ay ku fadhidaana ma jirto, Hay'adana waxaa ka horeeya Sharci, ma jirto Sharci la soo saarey oo Civil Registration Commission la yidhaahdo, Markaa side loo sameyn karaa Diiwaangalin Madaniya, Markaa hadii la doonayo in la sameeyo waa in la keeno oo Xeer loo sameeyo, Kaliya waxaa jira Xeerka Diiwaangalinta Doorashooyinka.

Sanad baa ka hadhey Doorashadii Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada sanadbaa ka hadhey, hodhow baa la odhan kordhin baa la doonayaa iyo waxbaan dhameyn, waxaan leeyahay ha la der-dergaliyo Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha, hana la joojiyo Diiwaangalintaa qeyru sharciga ah ee Madaniga ah.

**Xeerka Siyaasada Waxbarashada:-** ma xeerbaa mise waa siyaasad, waxaan u arkaa inuu yahay Xeerka Waxbarashada, markaas ayay imaneysaa Siyaasada waxbararashdu, Marka magac Xeerka ha la saxo oo halaga dhigo Xeerka Siyaasada Waxbarashad.

Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa **Xeerka Caasimada:-** dal baynu nahey dawladnimeynu dooneynaa, marka aynu dawladnimo dooneyno Caasimadadu hadaaney Xeer laheyn jiritaanka iyo Dawladnimadadu way kala dhinaaneysaa, markaa mudanayaal arrintaasi yaaney iskaga kiin qasnaanin Kala-xadeynta iyo Xeerka Caasimadu, waajib waxaa Xukuumada ku aheyd 12 bilood markii Xeer Lr/23 la ansixiyay in lagu sameeyo kala xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka, markaa Xukuumey u taalaa iney farsamadii lagu sameyn lahaa keento, laakiin in la barbar dhigo oo la yidhaahdo Goboladii iyo degmoyinkii dalku ma kala xadeysna ee Caasimadu Xeer yeelan meyso, Caasimadu waa caasimadii Qaranka, waxay u baahan tahay strategyad oo lakala saaro oo dhulka sidii loo kala degayay loo sameyn lahaa, maalin walba Dhulkii Dawlada iyo Dadkii baa isgalaya, Markaa Xeerka Caasimadu waa daruuri, sidaa darted waa la ansixiyaa dib u eegisna lagu sameeyaa loona daayaa halkaa uu ku jiro.

13. **Md. C/raxman Muuse Jaamac:-**
    - ✓ **Xasaanada:-** Xasaanadaa waxba kama jiraan mana ah waxaynu leenahay, waayo sanad baa ka soo wareegey maalintii halka laba askari intey iga heleen dhulka sidey ii jiidayeen dhibaato badan ii geysteen, Gudoomiyahu warqad buu ka qorey 12kii bisha, sanad bay mareysaa ilaa iminka wax lagaga jawaabey ma jirto, mida kale Wasiirka Arrimaha Guduhu halkaasuu yimi markhaati baynu ka aheyn wuxuu yidhi Wareegtan ka soo saarayaa Xasaanada Xildhibaanada, Taliyha Ciidanku wuxu yidhi khamiis walba fariin baanu u gudbinaa iney dhowraan Xasaanda Xildhibaanada, wax ka socdey ma jirto, Markaa yaynaan ku daalin Wasiir iyo Taliye yar oo aynu la hadalno.

Ajendaha aynu laba Xabo ku soo ururino, xeerar in lagu daro timirtii horeba dab loo waa weeye, Xeerka Ganaciga Bangiyada waa la isku haystaa, waxaa ka muhiimsan oo ah ineynu galno:-

- ✓ Xeerka Xabsiyad
- ✓ Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyaasha
- ✓ Xeerka hay'adda Tayada
- ✓ Xeerka HIV/AIDSka
- ✓ Xeerka Saxaafada
- ✓ Xeerka Duulista Hawada

**Waxaan ka saarayaa**

- ✓ **Xeerka Dib u habeynta Shuruucda** waxaan la qabaa Md. Buubaa waa in laga saaro isaga.

14. **Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** dhamaan horta Xeerarkan Ajendaha ku jira waa wada muhiim oo waa kuwo loo baahan yahay, Marka hore **Xeerka ka Ganacsiga Hawlaha Bangiyada**, Xeerka waxaan qabaa in loo baahan yahay dhowr jeerna Golaha wuu ku soo noq-noqdey waana lagu muransanayahay markaa waxaan qabaa in doodiisa la galo oo markaa Cod lagu kala baxo.

    **Xeerka Caasimada:-** isaga waan ka saarayaa waayo waxaa ka horeysa kala Xadeyntii Gobolada iyo Degmooyinka dalka.

    **Xeerka Saxaafada:-** Waxaa jirey Xeer 2004tii Goluhu ansixiyay, markaa Xeerkaa kaabis iyo wax ka badal waa lagu sameyn karaa, waana soo jeedinayaa, laakiin Xeer Cusub in hada la abuuro anigu ma qabo.

    Dhamaan Xeerarka kale Sidooda ayaan u deyn lahaa waana xeerar muhiima, sida Xeerka Siyaasada Waxbarashada oo muhiima in la qaabeeyo, Xeerka Ilaalinta Duurjoota iyo Keymaha isna waa muhiim oo waa in la ilaaliyo Duurjoogta iyo keymaha, intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa.

15. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-**
    **Xasaanada:-** anigu maqabo inay xasaanada Dawladeenu baranayaan, dawladaheenuba dawladnimada baran maayaan, waxaan leeyahay wax xasaand ah ha suginee, markey idin cayaan caaya oo iska celiyaya.

    **Xeerka Doorashooyinka:-** Ilaa Maanta Xeerarkii doorashooyinka oo Ajendahan xataa kuma jiro, Markaa Xeerarkaa Doorashooyinkiia iyo Diiwaangalintii waa in lagu soo daraa ajendaha, ileyn waxaa la leeyahey Diiwaangalintii baa la bilaabayaa Xeerba ma heyn goormaa la bilaabayaa.

    **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka:-** waa Must oo waa muhiim Xeerkaasi, Xeerkaasi isago halkaa yaal baa dagaal lagu qaadey dad dano gaar ah lihi, dalalka islaamka ah way wada jiraan baananka, ilaaheyna Jano iyo Cadaab buu abuurey cidna lagu khasbimaayo iney mid gaar ah galaan, Xeerkaa Ganacsiga Hawlaha Baananka war waa Muhiim, cid alaale iyo cid aduunyada ah oo inala macaamileysaana ma jirto.

Xeerka Hay'adda Dib u-habeynta Shuruucda:- Hay'addas waa Xaaraan waa qeyru sharci, waxay ka soo horjeedaa dastuurka waa shaqadii Golayaasha Sharci-dejinta.

**Xeerka Argagaxisada:-** Xamar Argagaxiso ayaa joogta, inagase Dawladaa argagaxisa ah oo RRU iyo dhibaata dadka ku haya, markaa yaynaan wax kale u ogolaan dadku lagu tacadigiisa lagu soo korodhsado.

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
| --- | --- |
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl |
| ------------------------------------------------ | ----------------------------------------- |

*